



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

SHARCI LR.009

Taariikh: 20 Maarso 2023

OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO
DIIWAANGELINTA DADWEYNAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad} iyo Faqradda 2^{aad} iyo 85^{aad} ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY:** Qodobka 90^{aad}, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka XGGSH/0240/B11/23, ku taariikheysan 14/03/2023, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.**
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.

Qodobka 2^{aad}

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



Madaxweynaha J. F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud





Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Tix: XGGSH/ 02 40/B11/23:الرقم

Mogadishu, Maarso 14, 2023 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Ujeeddo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga
Iyo Diiwaangelinta Dadweynaha**

M.ne Madaxweyne;


Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee *Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga Iyo Diiwaangelinta Dadweynaha* oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga Iyo Diiwaangelinta Dadweynaha wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd *Janaayo 7, 2023* wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG hindisahan ansixiyey *Maarso 1, 2023*, isla *Maarso 2, 2023* waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka *Maarso 13, 2023*.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dstuurka KMG kaaga codsanaynaa in *Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga Iyo Diiwaangelinta Dadweynaha* ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan

M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



- Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.



**BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA**

**SHARCIGA AQOONSIGA IYO
DIIWAANGELINTA DADWEYNAHA**

Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS



M. Sh. Aadan Maxamed Nuur “Madoobe”

Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS



Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar

Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS

M. Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow”

Maarso 14, 2023

Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye ku
Xigeenka Koowaad



جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب نائب الرئيس الأول

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The First Deputy Speaker

Ref: XGK1/18/13/2023 الرقم:

Taariikh: 11/3/23 التاريخ:

- ✓ Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Og:-Guddiga Arrimaha Gudaha Aqlka Sare ee BFS
Og:- Wasaaradda Arrimaha Gudaha X.F.S.
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeeddo:

Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha)

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: GAS/B-11/KF2/ /2023 kuna taariikheysan 11 Maarso 2023 kuna ansixiyay Goluhu Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha:

- Waxaa codeeyay 28 Senatar.
- Waxaa oggolaaday: 28 Senatar.
- Waxaa diiday: 0 Senatar.
- Waxaa ka aamusay: 0 Senatar.

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

Sen. Cali Shacbaan Ibraahim
Ku Xigeenka 1^{aad} Ahna Kusimaha
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya







ANSIXINTA SHARCIGA AQOONSIGA IYO DIIWAANGELINTA DADWEYNAHA

Senatarrada Codeeyay	Oggolaaday	Diiday	Ka Aamusay
28	28	0	0


Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

 Sen. Cali Shacbaan Ibraahim	Taariikh: 11 Mar, 2023
--	------------------------

Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

 Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi	Taariikh: 11 Mar. 2023
--	------------------------

Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahana ku-simaha Xoghayaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

 Cabdullaahi Xaaji Geeddi	Taariikh: 11 Mar, 2023
---	------------------------

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



**GOLAHA AQALKA SARE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**QARAAR GOLE
ANSIXINTA SHARCIGA AQOONSIGA IYO DIIWAANGELINTA
DADWEYNAHA**

**Muqdisho,
11 Maarso. 2023**

Tix: GAS/B-11/KF2/ /23

Kalfadhiga 2^{aad}

Kulankiisa 22^{aad}

Taariikh: 11 Maarso, 2023

GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

MARKUU AKHRIYAY:

Sharciga **Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **02 Mar. 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

MARKUU ARKAY:

Qod.82^{aad} iyo **Qod.83^{aad}** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49^{aad}** iyo **Qod.50^{aad}** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

MARKUU ARKAY:

Qod.61^{aad} (1) (3) ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

MARKUU TIXGELIYAY:

Soo jeedinta in Sharciga **Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha** loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

MARKUU GAROWSADAY:

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga **Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha**

ISAGA OO KU KULANSAN:

Kalfadhiga 2^{aad}, kulankiisa 22^{aad}, oo ay soo xaadireen
29 Senatar (labaatan iyo sagaal Senator).


WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

Qod.1^{aad}

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha** isaga oo aan waxba ka beddelin.

Qod.2^{aad}

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.


Sen. Cali Shacbaan Ibraahim
Ku Xigeenka 1^{aad} Ahna Ku simaha
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya





Ref: XGGSH/ 809 /B-11/23: الرقم

Mogadishu, March 02, 2023: التاريخ

- Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO
DIIWAANGALINTA DADWEYNAHA**

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangalinta Dadweynaha. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 24aad taariikhdu markay ahayd 1^{da} Maarso 2023, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Koramka:	147
Oggol:	146
Diiday:	0
Ka aamustay:	1

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah


Marwo Sacdiya Yaasiin Xaaji (Samatar)
Ku Simaha Guddoomiyaha ahna
Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka



ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO
DIIWAANGALINTA DADWEYNAHA

Tirada Xubnaha Codeysay 147:

Oggol: 146;

Diiday: 0;

Ka Aamustay: 1;

Ku Simaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad Golaha Shacabka
Baarlamaanka JFS

Xil. Sacdiya Yaasiin Xaari (Samatar)

Tar: 02/03/2023

Ku Simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ahna Xoghaye Ku Xigeenka Golaha
Shacabka

M.ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi - Ciyow

Tar: 02/03/2023



Tixraac: GWW01/ 00 21 /01/2023

Taariikh: 05/01/2023

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

Ujeeddo: -Soo Gudbin Hindise-sharciyeedk Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha.

Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada summaddiisuna tahay SHGW.00.16.01.23 ee 05/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha" oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye waxa aan halkan idin-kugu soo gudbineynaa "Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah; waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha " maadaama baahi weyn loo qabo meel marintiisa.

Naga guddooma salaan diirran iyo gaddarin

Mudane Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALAKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 2-01-2023
TIX: 00 21
SAXIIX: [Signature]



Tixraac: GWW02/085/01/2023

Tariikh: 05/01/2023

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada

Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

=Muqdisho=

=Muqdisho=

Ujeedo:- Go'aan Gole-Ansaxinta Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo
Diiwaangelinta Dadwaynaha

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} xarfaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100^{aad} xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda sumadeedu tahay WAGF&D/XW0111/2022 ee ku Tariikhaysan 11/12/2022 ee soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Fedaralka iyo dib u Heshiisiinta.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.16.01.23 ee 05/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha" oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.16.01.23 ee 05/01/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha " oo uu Goluhu ansixiyey.

Qodobka 2^{aad}

In "Hindise-sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha " si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.



Mudane Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation
Office of the Minister

Ref: WAGF&D/XW/0115/2022

Tar: December 15, 2022

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

=Muqdisho=

Og: Garyaqaanka Guud ee Dowladda

=Muqdisho=

Ujjeedo: Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga Iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha, 2022

Mudane R/Wasaare;

Markii aan arkay: Qodobka 99aad, faqradiisa (c) iyo Qod. 105, faq.1. ee Dastuurka KMGah ee JFS.

Markii aan arkay: Sharciga Lr. 30 ee 30kii Luulyo, 1984, ee Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Markii aan garwaaqsaday: Baahida Loo qabo in La helo Sharcigaan Si Loo Diiwaangaliyo loona aqoonsado dhamaan dadka ku nool Dalka JFS.

Markii ay lagama maarmaan noqotay: In la helo Hanaan diwaangalin iyo Aqoonsi muwaadiniinta Somaaliyeed si ay ugu fududaato adeegyada u baahanyihiin oo mideysan.

Mudane R/Wasaare;

Waxaan halkan kuusu soo gubinayaa kuuguna soo lifaaqayaa Hidise sharciyeedka ujeedada sare ku xusan oo ah Hidise sharciyeedka Aqoonsiga Iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha 2022. waxaanna kaa codsaneeynaa in aad naga aqbasho Hindise Sharciyeedkan si loo horgeeyo Golaha Wasiirada JFS, ka dibna loogu gudbiyo Barlamaanka FJS.

Naga Guddoon Salaan iyo Mahad celin badan

Amb. Axmed Macallin Fiqi
Wasiirka Wasaaradda





SUMMAD: XGG/299/2022

14/12/2022

→ **Ku: Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federalka & Dib u Heshiisiinta**
Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirada
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho

Ujeeddo: Talo Sharci

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda asaga oo tixraacaya Warqadda Ref. **WAGF&D/XW/0111/2022**, ee ku taariikhaysan **11 December, 2022**, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diwaangelinta Dadwaynaha**, kana Soo baxday Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federalka & Dib u Heshiisiinta.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 janaayo 1976, waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa:

Hindise Sharciyeedka Aqoonsiga iyo Diwaangelinta Dadwaynaha oo ay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federalka & Dib u Heshiisiinta horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay, kuna sameeyay hagaajin iyo sixid kuna biiriyay farsamo aan looga maarmin sameynta Hindise-sharciyeedkan, waxa uu Xafiiska Garyaqaanka Guud ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama aysan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Sharciga.

FG: halkaan waxaa ku lifaaqan Hindise Sharciyeedka Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

Avv. Maxamed Muxumed Cumar
Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE SHARCIYEEDKA AQOONSIGA IYO DIIWAANGELINTA DADWEYNAHA



Tusmo

Cutubka 1aad: Qodobbo Aasaasi Ah.....	3
Qodobka 1aad: Magaca Sharciga.....	3
Qodobka 2aad: Ujeeddooyinka Sharciga.....	3
Qodobka 3aad: Eray-Bixin.....	3
Qodobka 4aad: Xaqqa Helidda Aqoonsiga.....	4
Qodobka 5aad: Habraaca Sugidda Qofka.....	5
Qodobka 6aad: Bixinta Kaarka Aqoonsiga.....	5
Qodobka 7aad: Maareynta Cabashooyinka.....	5
Qodobka 8aad: Xogta La Diiwaangelinayo.....	5
Cutubka 2aad: Dhismaha Hay'adda.....	6
Qodobka 9aad: Asaasid.....	6
Qodobka 10aad: Ujeeddooyinka Hay'adda.....	6
Cutubka 3aad: Hawlaha , Awoodaha, Iyo Qaab-Dhismeedka Hay'adda.....	7
Qodobka 11aad: Hawlaha Hay'adda	7
Qodobka 12aad: Wadashaqeynta Iyo Iskaashiga	8
Qodobka 13aad: Awoodaha Hay'adda.....	8
Qodobka 14aad: Awoodaha Wasaaradda.....	8
Qodobka 15aad: Guddiga Maamulka Hay'adda (Board Of Directors)	9
Qodobka 16aad: Waajibaadka Guddiga Maamulka	9
Qodobka 17aad: Kulamada Guddiga Maamulka	9
Qodobka 18aad: Qaab-Dhismeedka Maamulka.....	10
Qodobka 19aad: Magacaabista Maareeyaha Guud Iyo Ku-Xigeenkiisa.....	10
Qodobka 20aad: Shuruudaha Looga Baahan Yahay Maareeyaha Guud Iyo Ku-Xigeenka Maareeyaha Guud	10
Qodobka 21aad: Xil-Waayidda Iyo Shaqo Ka Joojinta Maareeyaha Iyo Ku-Xigeenkiisa.....	10
Qodobka 22aad: Awoodaha Maareeyaha Guud.....	11
Qodobka 23aad: Xilka Ku-Xigeenka Maareeyaha Guud	11
Qodobka 24aad: Agaasinnada Iyo Howlwadeennada Hay'adda	11
Qodobka 25aad: Dhaarta Xafiiska	12
Qodobka 26aad: Miisaaniyadda Hay'adda.....	12
Cutubka 4aad: Qoobbo Qubane Ah	12
Qodobka 27aad: Xeer-Nidaamiyeyaal, Habraacyo, Iyo Xeer-Hoosaadyo	12
Qodobka 28aad: Faldambiyeedyada La Xiriiira Diiwaangelinta & Aqoonsiga Dadweynaha ..	13
Qodobka 29aad: Danaha Iska Hor-Imaanayo	13
Qodobka 30aad: Burin.....	13
Qodobka 31aad: Dhaqangal	13



Cutubka 1aad:
Qodobbo Aasaasi Ah
Qodobka 1aad:
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.

Qodobka 2aad:
Ujeeddooyinka Sharciga

Sharcigan wuxuu suurtagelinayaa ujeeddooyinka soo socda:

- 1) In la hirgeliyo hannaanka diiwaangelinta iyo aqoonsiga muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo si sharci ah u caddaynaya aqoonsiga muwaadinka una fududeynaya helidda dhammaan adeegyada uu u baahan yahay iyo xuquuqda sharcigu u oggolyahay;
- 2) In la taabo-geliyo hawlaha aqoonsiga iyo diiwaangelinta dadweynaha iyadoo la abuurayo hay'ad qaran oo fulisa howlaha iyo waajibaadka uu sharcigu u igmaday.
- 3) In lagu bixiyo Tirsi Aqoonsi gaar ah kaas oo lagu aqoonsanayo qofka haysta tirsigaas;
- 4) In la abuuro nidaam aqoonsi oo leh astaamo amni lagu xaqiijin karo aqoonsiga qofka si loo fududeeyo in dhammaan adeeg-bixiyaashu (hey'daha dowliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay) ay si kalsooni leh ula macaamilaan qofka sita aqoonsigaas iyaga oo ku kalsoon in qofkaasi uu yahay cidda uu sheeganayo;
- 5) In Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay yeelato nidaam aqoonsi oo la mid ah nidaamyada caalamiga ah.
- 6) In nidaamka aqoonsiga Dalka ku dhismo si sifo sharci oo ka jawaabaysa baahida aqoonsi ee dadweynaha ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kuwaas oo u baahan in ay helaan adeegyada aqoonsi ee u fududeyn lahaa macaamilkooda dhaqaale iyo xiriirradooda gudaha iyo dibeddaba.

Qodobka 3aad:
Eray-bixin

Haddii aan si kale loogu sheegin sharciga gudihiisa, ereyada hoos ku qoran mid waliba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

- 1) **"Sugid"** Waxaa loola jeedaa hab lagu xaqiijinayo in qofku yahay ruuxa uu sheeganayo;
- 2) **"Hay'adda"** Waxaa loola jeedaa Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka - (National Identification and Registration Authority – NIRA) ee lagu asaasay Sharcigan;



- 3) **“Xog-dhalyada”** (biometric) Waxaa loola jeedaa tilmaamaha la xiriira waxyaabaha u goonnida ah qofka ee ka turjumaya qaybo ka mid ah jirkiisa sida faraha, midabka indhaha, muuqaalka wejiga, iyo qaar kale;
- 4) **“Warqadda Dhalasho”** Waxaa loola jeedaa caddaynta la siiyo qofka u dhashay Soomaaliya;
- 5) **“Golaha Wasiirrada”** Waxaa loola jeeda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo ah hey’adda ugu saraysa Laanta Fulinta ee Dowladda si waafaqsan Qodobka 97aad ee Dastuurka Ku-meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- 6) **“Xarunta Xog-kaydinta”** Waxaa loola jeedaa barta lagu uruurinayo xogta ay Hay’addu hayso;
- 7) **“Maareeye Guud”** Waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Hay’adda;
- 8) **“Abtirsi”** Waxaa loola jeedaa xiriirka ka dhexeeya xubnaha qoys la diiwaan-geliyey sida waalidka iyo carruurtooda;
- 9) **“Habka Aqoonsashada Asaasiga”** Waxaa loola jeedaa hab qofka lagu aqoonsanayo oo loo abuuray inuu dadka u siiyo aqoonsasho loo adeegsado maamulka iyo macaamilka uu qofku la yeesho hey’daha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay;
- 10) **“Aqoonsasho”** Waxaa loola jeedaa hannaanka lagu hubinayo, lagu aqoonsanayo lagaga go’aan-gaarayo qofka uu yahay;
- 11) **“Kaar-aqoonsi”** Waxaa loola jeedaa kaarka aqoonsiga Qaranka ee ay Hay’addu si midaysan uga bixiso dalka oo dhan;
- 12) **“Wasiirka”** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
- 13) **“Wasaaradda”** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
- 14) **“Xog-horaadda”** Waxaa loola jeedaa macluumaadka laga diiwan-gelinayo qof walba sida magaca qofka, magaca aabbaha, magaca hooyada iyo taariikhda dhalashada;
- 15) **“Diiwaangelin”** Waxaa loola jeedaa xogta qofka oo lagu diiwaangeliyo si sharciga waafaqsan;
- 16) **“Nidaam”** Waxaa loola jeedaa habka aqoonsashada asaasiga ah;
- 17) **“Tirsi Aqoonsi”** Waxaa loola jeeda lambar aan taxane aheyn oo hal mar la isticmaalayo una goonni ah hal qof kaas oo qofka leh tilmaan soocaysa inta uu nool yahay iyo marka uu dhinto kadib.

Qodobka 4aad:

Xaqa Helidda Aqoonsiga

- 1) Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo qof walba oo si sharci ah u degan dalka marka laga reebo kuwa ku jooga booqashada gaaban



waxay xaq u leeyihiin in la diinwaangeliyo lana siiyo aqoonsi iyo dokumintiyada kale laguna kala duwayo habraaca iyo nooca aqoonsiga.

- 2) Wasiirka, isagoo tixgelinaya talo-bixinta Hay'adda, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye faahfaahinaya hannaanka fulinta diiwaangelinta Aqoonsiga Qaranka.

Qodobka 5aad:

Habraaca Sugidda Qofka

- 1) Qof walba oo qaadanaya kaarka aqoonsiga waa in la sugi karaa isaga oo la imaanaya dukumiinti ama wax u dhigma oo caddeynaya qofnimadiisa.
- 2) Shuruudaha diiwaangelintu waa inay fududaadaan una oggolaadaan dadweynaha in ay helaan adeegyada aqoonsi ee ay u baahan yihiin.

Qodobka 6aad:

Bixinta Kaarka Aqoonsiga

Bixinta Tirsiga, Daabacista Kaarka Aqoonsiga iyo adeegyada aqoonsi ee kale waxaa khidmadda lagu jaangoynayaa xeer-nidaamiye uu soo saarayo Wasiirku.

Qodobka 7aad:

Maareynta Cabashooyinka

- 1) Hay'addu waxay hirgalinaysaa nidaam lagu maareeyo cabashooyinka iyo tabashada ka timaada helidda iyo isticmaalka kaarka aqoonsiga kaasoo yeelan doona heerar kala duwan.
- 2) Hay'addu waxay soo saari doontaa Habraaca Xallinta Cabashooyinka oo loo hirgalin doono hab casriyaysan.
- 3) Cabashooyinka muwaadiniinta ee hay'addu u xalin weydo sidii la rabey ama lagu xallin waayey muddada ku xusan Xeer-hoosaadka, waxa ay u gudbeysaa Wasiirka.
- 4) Go'aanka kama dambaysta ah ee Wasiirka ee ku saabsan cabashada laga soo qaatay Hay'adda waxaa looga dacwoon karaa Maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 8aad:

Xogta La Diiwaangelinayo

- 1) Lama uruurin karo xog xasaasi ah oo keeni karta in qofka la takooro ama la faquuqo.
- 2) Xogta la diiwaangeliyay looma isticmaali karo ujeedooyin ka baxsan ujeeddada loo qabtay marka laga reebo inta sharcigu oggol yahay.
- 3) Xogta la diiwaangelinayo waa in ay ku koobnaato waxyaabaha soo socda:
 - a) Magaca qofka oo la xeriir magaca aabaha iyo kan awoowaha, ama magaca qoyska oo afaran.
 - b) Lama diidi karo Magacyada, sida Xaaji, Suldaan, Shiikh, Ugaas, Shariif, Garaad, Macallim iwm.



- c) Magaca hooyada (oo saddexan);
- d) Taariikhda uu qofku dhashay (maalinta, bisha iyo sannadka);
- e) Goobta uu ku dhashay (Degmada, Gobolka, Waddanka);
- f) Deegaanka uu deggan yahay;
- g) Jinsiga (dhedig ama lab);
- h) Sawirka qofka (teesare);
- i) Raadka faraha (10ka farood) iyo/ama sumadda indhaha (IRIS);
- j) Lambarka telefoonka iyo/ama "emailka" qofka;
- k) Xaaladda sharci (Muwaadin, Qaxooti, iwm.)
- l) Xogta sugidda aqoonsiga qofka ee ku soo baxay dukumiinti.

4) Xogta la ururiyay waxa lagu keydinayaa xarun ta xog-dhiggista Hay'adda.

Cutubka 2aad:
Dhismaha Hay'adda
Qodobka 9aad:
Asaasid

- 1) Waxaa Sharcigan lagu asaasay "Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka".
- 2) Hay'addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni ah oo ay ku maareeyso arrimaheeda.
- 3) Xarunta Dhexe ee Hay'addu waa Caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho waxayna laamo ku yeelanaysaa magaalooyinka waaweyn ee dalka iyo hadba meeshii kale ee ay u baahato.
- 4) Wasiirku, isagoo tixgelinaya tala-bixinta hay'adda, wuxuu go'aan maamul ku soo saarayaa astaanta ay yeelanayso Hay'adda.

Qodobka 10aad:
Ujeeddooyinka Hay'adda

Ujeeddooyinka loo asaasay Hay'adda waxaa ka mid ah:

- 1) In muwaaddiniinta ay noqdaan dad la aqoonsan karo oo dukumiintiga aqoonsiga ay sitaan iyo tirsiga aqoonsi ee u goonida ah uu noqdo mid sahlaya adeegyada ay u baahan yihiin;
- 2) Inay xoojiso isku-dubbaridka iyo wax-wada-qabadka shaqooyinka hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada ay aqoonsashada qofku muhiimka u tahay iyo isku xirka adeegyada dowladda qaab elektaroonik ah.
- 3) In ay abuurto, kuna heyso xogta aqoonsiga xarunta xog-dhigista ee hay'adda taasoo keydinaysa dhammaan xogaha dadweynaha ee muhiimka u ah dawladda;



- 4) Inay gacan ka geysato koboca dhaqaalaha Qaranka, horumarinta fursado dhaqaale, ka-hortagga is-dulbuurad dhanka adeeg-bixinta iyo ku-xadgudub xuquuqaha aadamiga oo ka dhalan kara aqoonsasho la'aan.

Cutubka 3aad:

Hawlaha , Awoodaha, Iyo Qaab-Dhismeedka Hay'adda

Qodobka 11aad:

Hawlaha Hay'adda

Hay'addu waxay qabanaysaa hawlahaan soo socda:

- 1) Inay abuurto, ka shaqaysiiso, maamusho oo ay dhawrto nidaam maarayn aqoonsi oo asaasi ah, si ay u suurta-gasho in qof kasta oo muwaaddin ah ama si sharci ah ugu nool Soomaaliya la diwaangeliyo;
- 2) In mawaaddiniinta ku diwaangeliso nidaamka ayna siiso tirsi aqoonsi oo u gooni ah oo lagu aqoonsan karo;
- 3) Inay bixiso kaar aqoonsi ee heer Qaran;
- 4) In ay mas'uul ka tahay barnaamijyo lagu hormaarinayo adeegyada la xiriira diiwaangelinta iyo keydinta xogta aqoonsiga dadweynaha oo ay kala shaqaynayso wasaaradda sidii loo maarayn lahaa nidaamyada elektaroonigga ah ee diiwaangelinta iyo maamulka xogdhigista ay ku kaydinayso diiwaangelinta xogta aqoonsiga dadweynaha;
- 5) In ay hirgeliso tababarada nidaamka diiwaangelinta madaniga ah iyo qorshayaasha taakulaynta farsamo;
- 6) Inay shakhsiyaadka siiso xogta la xiriira xaaladdooda diiwaan-gelineed;
- 7) In ay hubiso dhawrsoonaanta xog-dhalyada iyo xog-horaadda shakhsiyaadka ee ay Hay'addu ururisay, una maarayso si xilkasnimo leh oo waafaqsan Sharciga;
- 8) In ay qaab elektaroonik ah isugu xirto xarunta xog-dhigista iyo hay'adaha Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee bixiya adeegyada uu aqoonsigu muhiimka u yahay, taas oo loo marayo habraacyo;
- 9) Inay cilmi-baaris ku samayso sida ugu wixtarka roon iyo waxyaabaha guud ee ku soo kordha sida loo maareeyo aqoonsiyada hay'adaha kale ee Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn, isla markaasna ay la wadaagto xogta ama waayo'aragnimada la xiriira aqoonsashada;
- 10) Inay si wax-ku-ool ah isugu duwdo, tayo ahaanna u dhisto laamaha ay Hay'addu ka furato dalka;
- 11) Si loo hormariyo mudnaanshaha siyaasadda, dhaqaale, bulsho iyo amni ee dalka; iyo
- 12) Inay fuliso, hadba inta sharcigu u oggolanaayo, wixii hawl kale ah oo muhiim u ah ama ku habboon gudashada waajibaadkeeda.



Qodobka 12aad:

Wadashaqeynta iyo Iskaashiga

- 1) Hirgelinta sharcigan waxay Hay'addu iskaashi kala yeelanaysaa Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda.
- 2) Dhammaan Hay'adaha gaarka loo leeyahay, waxaa waajib ku ah in ay Hey'adda kala shaqeeyaan fulinta howlaheeda si waafaqsan sharcigan.
- 3) Dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah in ay is diiwan-geliyaan, qaataanna tirsi gooni u ah.

Qodobka 13aad:

Awoodaha Hay'adda

- 1) Hay'addu, iyadoo aan dhaafayn xeyndaabka Sharcigu xadeeyey, waxay awood u leedahay wax kasta oo daruuri u ah ama ku habboon sidii ay u gudan lahayd hawlaheeda.
- 2) Iyadoon la xadayneyn sida guud ee faqradda hore u dhigan tahay iyo awoodaha ka ratibmaya in Hay'addu leedahay shakhsiyad qaanuuni ah, Hay'addu waxay si gaar ah awood ugu leedahay:
 - a. In ay dacwad soo oogi karto, laguna soo oogi karo;
 - b. In ay geli karto heshiisyada la xiriira shaqadeeda;
 - c. Inay iibsano karto, haysano karto ama iska iibin karto hantideeda si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka;
 - d. Inay qaadato wixii qalab ama dhaqaale ah ee loogu deeqo si waafaqsan shuruucda dalka u taalla;
 - e. In iyadoo raacaysa Sharciga Shaqaalaha Rayidka lagu maamulo ay qorato, shaqadana ka eryi karto shaqaalaheeda; iyo
 - f. In ay kala shaqayn karto ama u idman karto dhinac kale hawlaha la xiriira hirgelinta nidaamka aqoonsiga si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

Qodobka 14aad:

Awoodaha Wasaaradda

Si waafaqsan Sharcigaan, Wasaaraddu waxay yeelanaysaa awoodaha soo socda:

- 1) Dejinta siyaasadaha guud ee aqoonsiga dadweynaha;
- 2) Ka-baaraandegista iyo curinta shuruucda ay hay'addu u baahan tahay;
- 3) Kor-joogteynta hawlaha hay'adda iyada oo ku ilaalinaysa qodobbada sharcigan;
- iv. metelaadda hay'adda ee golaha wasiirrada iyo goleyaasha baarlamaankaba.



Qodobka 15aad:

Guddiga Maamulka Hay'adda (Board of Directors)

- 1) Hay'adda waxay yeelanaysaa Guddi Maamul oo 9 xubnood ah kana kooban Maareeyaha, iyo 8 xubnood oo ka kala imaanaya wasaaradaha iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud, waana sida soo socda:
 - a. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, (xubin)
 - b. Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, (Xubin)
 - c. Wasaaradda Amniga Gudaha, (Xubin)
 - d. Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda, (Xubin)
 - e. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, (xubin)
 - f. Wasaaradda Maaliyadda, (Xubin)
 - g. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, (Xubin)
 - h. Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowallada, (Xubin)
- 2) Xubinta wasaarad kasta waxa soo magacaabaya wasiirka ay khasayso, isaga oo kusoo xulaya aqoon iyo khibrad shaqo oo la xiriirta hawlaha hey'adda.
- 3) Xubnaha guddiga maamulka waxay yeelanayaan gunno uu go'aamiyo Wasiirka.
- 4) Maareeyaha guud ee hay'adda waa guddoomiyaha guddiga maamulka (board of directors). Marka uu maareeyuhu maqan yahay waxaa shir guddoonka qabanaya Maareeye Ku-xigeenka.
- 5) Haddii xubin guddiga kabanaanato waxaa lagu soo buuxinayaa si waafaqsan faqradda 2aad ee Qodobkan.

Qodobka 16aad:

Waajibaadka Guddiga Maamulka

Guddiga maamulku wuxuu u xilsaaran yahay :

- 1) Hubinta iyo ansixinta qorshe hawleedka Ha'yadda kadib marka uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud ee hay'adda.
- 2) Dhageysiga warbixinta sanadlaha ah ee hay'adda.
- 3) Ansixinta xeer hoosaadka iyo habraacyada hay'adda.
- 4) Ka-baaraandegista iyo ansixinta miisaaniyadda Hay'adda iyo ansixinta xisaab xirkeeda.

Qodobka 17aad:

Kulamada Guddiga Maamulka

- 1) Kulmada caadiga ah ee guddiga waxay qabsoomayaan afartii biloodba halmar.
- 2) Guddigu waa in uu kulmaa markasta uu isugu yeero:
- 3) Wasiirka;
- 4) Guddoomiyaha guddiga 3. Guntanka kulamada guddiga iyo go'aanna doodu waxay ku ansaxayaan tiro hal dheeriya (50%+1). Guddoomiyaha wuxuu codeeynayaa kaliya marka ay codadku isle ekaadaan.



- 5) Hay'addu waxay diyaarinaysaa xeer-hoosaad lagu maaraynayo kulamada guddiga, una gudbinaysaa Wasiirka si uu u oggolaado.

Qodobka 18aad:

Qaab-dhismeedka Maamulka

- 1) Hay'addu waxay yeelanaysaa:
 - a. Maareeye Guud;
 - b. MaareeyeKu-xigeenGuud;
 - c. Agaasime waaxeedyo; iyo d. Shaqaale.
- 2) Qaab-dhismeedka Hay'adda waxa soo saaraya Maareeyaha Guud, waxaana meelmarinaya Wasiirka.

Qodobka 19aad:

Magacaabista Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa

- 1) Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana meel marinaya Golaha Wasiirrada, kadibna waxaa Xeer Madaxweyne ku soo magacaabaya Madaxweynaha JFS sida ku xusan Qodobka 90aad, Xarafkiisa (K) iyo Qodobbada 99aad ee Dastuurka, isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.
- 2) Xil-ka-qaadista Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waxaa loo marayaa habraaca ku cad faqradda 1aad ee Qodobkaan.

Qodobka 20aad:

Shuruudaha looga baahan yahay Maareeyaha Guud iyo

Ku-xigeenka Maareeyaha Guud

Qofka loo magacaabay Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waa in laga helaa shuruudahan soo socda:

- 1) Inuu yahay muwaaddin Soomaaliyeed Muslim ah.
- 2) In dhimirkiisu fayow yahay;
- 3) Inda'diisu aanay ka yarayn 30sano;
- 4) Inuu haysto shahaado heer-jaamacadeed;
- 5) Inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo oo aan ka yarayn (5) sano, khibridna u leeyahay maamulka iyo maaraynta;
- 6) Inaan si kama danbeys ah maxkamadi ugu xakumin danbi 5tii sano ee ugu danbeeyse.;

Qodobka 21aad:

Xil-Waayidda iyo shaqo ka joojinta Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa

- 1) Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa Xilka waxay kuweyn karaan:
 - a. Xanuun xagga dhimirka ah uu soo caddeyo dhakhtar lagu kalsoon yahay;



- b. Geeri;
 - c. Xil-gudasho la'aan si waafaqsan habraacyada waajibaadka shaqo ee hay'adda.
 - d. Dembi-ciqaabeed ay soo caddeysay maxkamadda awoodda u leh; iyo
 - e. Isasilaad laga aqbalay.
- 2) Wasiirku wuxuu shaqo-ka joojin ku samayn karaa Maareeyaha ama ku-xigeenkiisa sababaha soo socda dartood:
 - 3) U hoggaansamid la'aan faritaanada kor-jooqteeneed ee Wasiirka si waaafaqsan sharcigan; iyo
 - 4) Ku xadgudubidda sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaalkiisa iyo shuruucda kale ee dalka.

Qodobka 22aad:

Awoodaha Maareeyaha Guud

Awoodaha Maareeyaha Guud waa sida soo socota:

- 1) Dejinta, lasocodka, hirgelinta iyo kormeerka qorshaha shaqo ee Hay'adda;
- 2) Diyaarinta qaab-dhismeedka iyo habraacyada lagu socodsiiyayo hawlaha Hay'adda;
- 3) Diyaarinta miisaaniyad-sanadeedka Hay'adda;
- 4) Qoristaiyoxil-ka-qaadistashaqaalaha Hay'adda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka; iyo
- 5) Matalaadda Hay'adda dhinaca Sharciga iyo gelista heshiisyada.

Qodobka 23aad:

Xilka Ku-xigeenka Maareeyaha Guud

Ku-xigeenka Maareeyaha guud wuxuu u xil saran yahay:

- 1) Qabashada xilka Maareeyaha Guud marka uu shaqada ka maqan yahay; iyo
- 2) Qabashada wixii hawl kale ee Maareeyaha Guud si gaar ah ugu igmado.

Qodobka 24aad:

Agaasinnada iyo howlwadeennada Hay'adda

- 1) Hay'addu waxay yeelanaysaa Agaasin waaxceedyo hoggaamiya waaxaha Hay'adda.
- 2) Hay'addu waxay shaqaalaysiinaysaa howlwadeenno iyo shaqaale ku kaalmeeya fulinta howlaheeda iyo xilkeeda.
- 3) Qorista, shaqo-gelinta, anshax-marinta iyo shaqo ka saaridda agaasimeyaalka, howlwadeennada iyo shaqaalaha kaleba waxaa loo waafajinayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka.
- 4) Hay'addu waxay kaloo yeelanaysaa laamo iyo faracyo ka hirgeliya hawlaha dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



Qodobka 25aad:
Dhaarta Xafiiska

- 1) Xog-dhigista waa inay taallaa xarumaha Hay'adda ee dalka gudihiisa ah, waxaana ka reeban in lagu hayo ama la geeyo meel ka baxsan xarumaha rasmiga ah ee Hay'adda, dadka gacanta ku hayaana waa in ay yihiin dad Soomaali ah oo la dhaariyey, lagana saxiixay qoraal.
- 2) Shaqaalaha Hay'adda ee u xilsaaran maamulka xogta inta aysan billaabin shaqada loo igmadey waa in Maareeyaha Guud hortiisa iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ku maraan dhaarta ilaalinta xogta dhawrista u baahan ee Hey'adda, waana in laga saxiixaa heshiis xog-ilaalined, loona caddeeyaa cawaaqibta ka dhalan karta bixinta xogta dadweynaha.
- 3) Dhaarta lagu xusay faqrada hore ee qodobkan ma beddeleyso dhaar kale oo Sharcigu ku waajibiyo shaqaalaha.
- 4) Waajibaadkii ay dhaartu saartay qofka shaqaalaha ka ah Hay'adda, kama dulqaadeyso xitaa haddii uu shaqada uga tago hawlgab awgeed ama sabab kasta oo kale.
- 5) Habraaca dhaarta iyo xog-ilaalinta la xiriira waxaa si faahfaahsan loogu soo saari doonaa Xeer-nidaamiye Hay'adda.

Qodobka 26aad:
Miisaaniyadda Hay'adda

Hay'addu waxay yeelanaysaa misaaniyad u gaar ah oo ka imanaysa:

- 1) Miisaaniyadda guud ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;
- 2) Dakhliga laga helo adeegyada ay Hay'addu fuliso waxaa loo marayaa si waafaqsan habraaca Sharciga maamulka maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya;
- 3) Kaalmada miisaaniyadeed ee laga helo deeq-bixiyeyaasha gudaha iyo dibadda si waafaqsan habraac maaliyadeedka Dawladda.
- 4) Maareeyaha Guud ee Hey'adda waa in uu sanad walba ugu dambeyn 30ka Oktoobar uu diyaariyaa qorshaha Miisaaniyad-sanadeedka Hey'adda, taasoo muujineysa dhammaan kharashka iyo dakhliga ee la filayo, una gudbiyo guddiga maamulka, ka dibna Wasaaradda Maaliyadda ee XFS.

Cutubka 4aad:
Qoobbo Qubane Ah
Qodobka 27aad:

Xeer-nidaamiyeyaal, habraacyo, iyo xeer-hoosaadyo

- 1) Wasiirku waxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya qodobbada sharcigan.



- 2) Hay'addu waxay awood u leedahay soo saarista xeer-hoosaadyo iyo habraacyo ay ku fulineyso howlahceda oo aan ka hor imaanayn Sharcigaan iyo xeer nidaamiyeyaal kiisa.

Qodobka 28aad:

Faldambiyeedyada La Xiriira Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha

- 1) Qof kasta oo ku kaca arrimaha soo socda wuxuu galayaa dembi uu ku muteysanayo ciqaabta ku qoran faqradda 2aad ee Qodobkan:
- a. Bixinta hor-xog aan run ahayn ama sheegasho qof uusan ahayn xilliga diinwaangelinta.
 - b. Ka hor istaagga qof xaq u leh in uu qaato tirsiga iyo kaarka aqoonsiga
 - c. Isku day sameyn kaarka aqoonsiga si aan sharciga ahayn.
 - d. Sameynta nuqul been abuur ah ee kaarka aqoonsiga
 - e. Isticmaalka iyo haysiga kaarka aqoonsi qof kale leeyahay.
 - f. Ka been sheegid diinwaangelin hore loo sameeyay
 - g. Isku day isdiinwaangelin mar labaad ama in ka badan.
 - h. Baahinta ama la wadaagista xogta diinwaangelinta qof kale oo aan shaqo ku lahayn.
 - i. Ku kicista khiyaano kasta oo la xeriirta aqoonsiga iyo diinwaangelinta
 - j. Dhammaan faldambiyeedyada la xeriira been-abuurka dokumenti ee xeerka ciqaabta soomaaliyeed.
- 2) Qof walba oo faldambiyeedyadan ama kuwa la mid ah gala waxaa lagu qaadayaa xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 29aad:

Danaha Iska Hor-Imaanayo

Qofna xil kama qaban karo, mana sii joogi karo hay'adda, ha ahaado xubin Guddi Maamul ama shaqaale, haddii ay jiraan dano iska hor-imaanaya si waafaqsan habraacyada shaqo ee hay'adda.

Qodobka 30aad:

Burin

Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin qodobbada Sharcigan waa la buriyay.

Qodobka 31aad:

Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uuna saxiixo Madaxweynaha JFS laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

